



TALLAALKA JOHNSON & JOHNSON COVID-19

HEL XAQIIQOOYINA.

Maxaa dhacay


Laga bilaabo Abriil 2021, in ka badan 15 qof, oo u badan haween u dhaxeeya 18 iyo 48 sano jir, ayaa xinjirowga dhiigga ku dhacay dhowr toddobaad kadib markii ay qaateen tallaalka J&J.

Xinjirowga dhiiggu AAD ayuu dhif u yahay

Laga bilaabo Abriil 2021, in ka badan 8 milyan oo tallaal J&J COVID-19 ah ayaa lagu bixiyey Mareykanka

Haweenka u dhaxeeya 18 iyo 48 sano jir, xinjiro dhiig ayaa ku dhacay qiyaastii **7 ka mid ah 1 milyan oo haween ah.** Haweenka 49 sano iyo ka weyn, iyo ragga da' kasta ha lahaadeene. Waa si dhif.

Tan macnaheedu waa fursadda **qof kasta inuu ku helo xinjirowga dhiigga tallaalka kadib aad ayey u yar tahay.**



Dadku waxay aad ugu dhowdahay inay si daran u bukoodaan ama u dhintaan COVID-19 halkii ay ka heli lahaayeen xinjirowga dhiigga.

Malaayiin dad ah ayaa si **badbaado leh loogu tallaalay tallaalka** J&J, oo ay ku jiraan dad jinsiyo, qoomiyado iyo da'o kala duwan leh.



J&J waa **hal cirbad oo keliya**, markaa waa ku habboon tahay, ammaan iyo waxtar leedahay.

Ikhtiyaarro kale oo tallaal ayaa jira. Saamayn dhinac socod ah oo ah dhiig guntinno ayaa lagu sheegay tallaalda labada qaadasho ah.

Haddii aad wali su'aalo qabtid, kala hadal dhaqtarka haddii tallaal kale uu adiga kuu fiicnaan karo.



NRC-RIM
National Resource Center for
Refugees, Immigrants, and Migrants

ASTAAMAH AAD EEGAYSO



In kasta oo xinjirowga dhiiggu aad u yar yahay, inta lagu jiro **saddexda toddobaad ee tallaalka J&J kadib, u tag dhakhtar isla markiiba haddii aad leedahay mid ka mid ah astaamahan:**

- Madax-xanuun daran ama joogto ah
- Aragga oo yeesha haydh-haydh
- Neef qabatin
- Laab xanuun
- Lug barar
- Xanuun joogto ah oo caloosha ah
- Nabaro fudud ama dhibco dhiig oo yaryar maqaarka hoostiisa oo ka baxsan meeshii laga muday

TALLAALKA J&J WAA AMMAAN

Saraakiisha caafimaadka ee Mareykanka ayaa si dhaw ula socda dhibaatooyinka caafimaad ee ka yimaadda tallaalada. Waxay u tixgeliyaan wixii walaac ah si dhab ah.

Saraakiisha caafimaadka ayaa hakiyay tallaalada J&J si ay wax badan uga ogaadaan xinjirowga dhiigga.

Joojinta tallaalka ee saameynaha dhifka ah ee noocan oo kale ah waxay muujineysaa in saraakiisha caafimaadka ay si dhow ula socdaan tallaallada.

Saraakiisha ayaa hadda go'aamiyyay



Khatarta xinjirowga
dhiigga ee tallaalka J&J
aad ayey u yar tahay



Xinjiraha dhiigga waa la
daaweyn karaa



Faa'iidata tallalku
waxay aad uga culus
tahay khatar kasta oo
ka timaadda

Ilaali naftaada. Ilaali bulshadaada. Tallaal qaado.